

Wixii ku saabsan **XEERKA HAB DHAQANKA SBS-ka**

SBS waa telefishanka dadweynaha qaranka ee madaxa banaan, raadiye iyo adeega warbaahinta dhijitaalka oo ay masuul ka tahay bulshada reer Australiya sida lagu xusay axdigayaga (**our Charter**). Waxaa kharajkayaga bixisa Xukuumada Australiya iyo dakhliga ganacsiga sida iidhehda.

Dhamaan shabakadeheena waxaan la wadaagnaa sheeko-gudbin leh astaan Australiyaana, akhbaar caalami iyo maxali ah iyo wixii hadba socda, cayaaro, filimada iyo dhacdooyinka, cuntada, filimada iyo adeegyada raadiyaha maxaliga ah oo ka badan 60 luqadood. Waxaanu kaloo nahay hoyga sheeko-sheegayaalkii ugu horreeyey, oo leh Telefishanka Qaranka ee Asaliga (NITV) kuwaas oo bixiya barnaamijyo lagu muujiyo aragtida asaliga.

Si loo xaqiijiyo in wararkayagu ka jawaabayaan waxa dadweynuhu filanayaan, waxaanu leenahay Xeerka Habdhaqanka SBS-ka, kaas oo dhigaya xeerarka iyo mustawayaalka dhamaan barnaamijyada SBS iyada oo aan ku xirnayn meeshaad ka dhegaysato – telefishan, raadiye, online ama warbaahinta bulshada.



Xeerka iyo Habdhaqanku wuxuu ka hadlaa arrima muhiima..



AAMINAAD

Waxaanu bixinaa warar lagu kalsoonaan karo oo ku haboon

- Waxaanu samaynaa go'aamo madax banaan oo ku saabsan barnaamijyadayada.
- Wararkayaga iyo waxyaallaha taagan waa kuwa sax ah, isu dheelitiran oo aan dhinacna raacsanayn, ahna danta dadweynaha.
- Waxaanu soo dhowaynaa aragtiyo badan oo isku dhafan oo leh wajiyo kala duwan – macluumaadka aanu gudbinnaa wuxuu noqon karaa kuwa leh hal-abuur iyo loolan isla markaana iska soo horjeeda oo ah leh daandaansi/kicin.



DAAHFURNAAN

Sidaan ku caawin karo hagida kala doorashada barnaamijyadaada

- Waxaanu bixinaa macluumaad sidaas darteed waxaad dooran kartaa waxa kugu haboon, iyo carruur kasta oo dhalin yar oo ku jira daryeelkaaga.
- Waxaan xaqiijinaa in iidhehdu ay tahay mid ka muuqata barnaamijayaga waxaana samaynaa shuruuc xeerinaysa meelaynta noocya mucayina oo ii dheh ah.
- Wararka aadka walaaca u leh, waxaanu u qoondaynaa dhegastayaasha ku haboon, waxaana muujinaa taxadar, waxaan bixinaa digniin markay ku haboon tahay, waxaana muujinaa taas keliya haddii ay faallo ahaan khusayso.



IXTIRAAM

Sidaan u dhaqano una kobcino ixtiraamka



- Waxaan ka fogaanaa waxyaallaha ama qoraallada kor u qaadaa eexda iyo cunsuriyada taas oo ay ku jirto isticmaalida aan loo meel deyin oo ah kuwa la iska aaminsan yahay, iyada oo la qadarinayo xaallada.
- Waxaanu ku bixinaa wararka luqado aan ka ahayn Ingiriis waxaana dhiirigelinaa aragtiyo kala duwan.
- Waan ka taxadarnaa soo qadimida arrimaha dadka asaliga ah waxaana la soconaa baratakoolada dadka ka soo jeeda Aborijiniska iyo Torres Strait Islander-ka.
- Waxaanu ixtiraamnaa barayfasiga dadka, annaga oo dheelitir ugu samayna masuuliyadayada werinta.



ISLA-XISAABTANKA

Sida aanu masuul uga nahay

- Waxaanu bixinaa dariiqooyin aragti looga bixiyo wixii ku saabsan wararkayaga iyo adeegyada, ama ha ahaato soo dhowayn ama diidmo.
- Waxaan leenahay hab madax banaan oo cabasho taas oo hoos imanaysa Xeerka iyo Habdhaqanka, kaas oo uu baaro Ombudsman-ka SBS.



Wax badan ogow

sbs.com.au/aboutus/sbs-code-of-practice